

## **Magaaladda Seattle iyo King County – Maxaan Maqalnay iyo xaggee u soconaa Wacyigelinta qaybta gaadiidka la kireysto – May 2021**

### **Waxa aan maqalnay - Xog ururinta**

Waxaan qabanay xog ururin bishii Febraayo, waxa aan weydiinay mulkiilayaasha medallion iyo wadayaasha in ay noo sheegaan waxa ay kala kulmaan ka shaqaynta gaadiidka la kireysto iyo isbedelada ay jeclaan lahaayeen in ay arkaan.

Waa kuwaan wixii aan maqalnay:

- Dadka jawaabay badankoodu waxa ay wadayaal ka ahaayeen wax ka badan shan sano, waxa ay wadaan wakhti buuxa isagoo ahaa isha ugu weyn ee dakhli ka soo galo, qolo kale oo khidmad bixisana wax uma wadeyn.
- Caqabaadka ugu weyni waxa ay ahaayeen kharashka Caymiska iyo kharashka sharciyeynta (diiwaangelinta).
- Kala duwanaanta sharciyeynta (diiwaangelinta) TNC iyo gawaarida taksiga iyo gaadiidka kale ee la kireysto gaar ahaan xagga heerarkooda ayaa badanaaba la tilmaamayay in ay yihiin waxa u keenaya shaqo la'aanta gawaarida taksiga iyo gaadiidka kale ee la kireysto.
- Dadkii jawaabay qaarkooda waxa ay sheegeen xadida da'da loo ogol yahay gaadiidka, ujuurada lagu qaado gegida dayuuradaha iyo safarrada gaagaaban in ay yihiin caqabaadka.

### **Waxa Aan Maqalnay- Wareysiga kooxaha**

Waxaan qabanay shan kooxood oo laga wareysanayo kana tirstan mulkiilayaasha medallion iyo wadayaasha bishii Maarso waxaana la weydiiyay jawaab celintooda siyaasaddo gaar ah oo la soo bandhigey mowduucyo sida in gobolka loo sameeyo medallion iyo in laga dhigo gaadiidka la kireysto oo dhan gawaari taksi ah.

Waa kuwaan wixii aan maqalnay:

- Ka qaybgalayaasha xog ururinta badankoodu waxa ay taageersan yihiin in loo wareego hab medallion oo gobolka oo dhan ah, logana dhigayo gaadiidka la kireysto oo dhan gawaari taksi ah iyadoo la istimaalayo mitiro casri ah oo leh siciro is bedelayaa. Qaar ka mid ah ka qaybgalayaasha ayaa walaac ka muujiyay sidii loogu magdhabi lahaa mulkiilayaasha medallion ee hadda ee labaalaha ah haddii medallion kulligood labaale noqdaan.
- Ka qaybgalayaashu waxa ay doonayaan in magaalada iyo degmadu fududeeyaan shuruudaha caymiska si loo kodhiyo tirada caymisyada ee suuqa laga helayo. Tiro yar oo caymisyada la heli karo macnaheedu waa siciro sare.
- Mulkiilayaasha medallion iyo wadayaashu waxa ay doonayaan in gargaar degdeg ah sida in la yareeyo khidmada sharciyeynta ama meesha laga saaro, ama qaab kale oo taageero maaliyadeed maadaama suuqa qaybtaani wali la daaladhacayso xanuunka caalamiga ah ee COVID.

Xog ururinta ka sokow waxaan la kulanay ururka taksiilayaasha, shirkadaha gaadiidka kale ee la kireysto iyo kooxaha kale ee ganacsi si looga wada hadlo caqabadaha suuqaan iyo tallooyinka isbedeladda sharciyeed ee loo baahan yahay. Fikradahaani waxa ay muraayad u yihiin afkaaraha kale ee la helay.

### **Xaggee u soconaa – Qorsheyaasha:**

Iyadoo ku dhiman jawaab celinaddii aan maqalnay, Magaalada iyo degmadu waxa ay

qaadayaan tillaabooyinka soo socda:

- Waxa ay siinayaan gargaar degdeg ah iyadoo hoos loo dhigayo khidmadaha cusboonaysiinta medallion, khidmadaha shatiyada wadayaasha oo la yareeyay, khidmadaha shatiyada cusboonaysiinta ururada taksiilayda iyo gaadiidka kale ee la kireysto iyo khidmaha kale - dhammaantood sharciyaynta sanadka soo socda. Sidoo kale, in dhaqan gelinta 10ka-sano heerka da'da la joojinayo illaa Juun 30, 2022.
  - Magaalada iyo Degmadu way dhammaystireen oo ay bilaabeen hirgelinta xirmooyinka (qorshayaasha) gargaarka degdegga ah.
- Waxa ay soo jeedinayaan in la soo saaro xeer lagu samaynayo medallion ee gobolka, in la qaato mitiro casri ah, in la hagaajiyo shuruudaha Caymiska iyo isbedello kale oo loogu talo galay fududeynta iyo toosinayo shuruucda.
  - Magaalada iyo Degmadu waxay qorsheynayaan inay u soo gudbiyaan sharciga la soo jeediyay Golaha Magaalada iyo Maamulka Gobolka dhamaadka sanadka.
- Soo jeedinta sharciyo maamul si wax looga qabto qiimaha lagu raaco safarada gaagaaban ee ka imanaya Gagida Diyaaradda Sea-Tac, shuruudaha caymiska iyo isticmaalka saacadaha taksiga casriyeysan oo casriga ah iyo sicirka is bedbeddelaya.
  - Magaalada iyo Degmadu waxay qorsheynayaan inay dhameystiraan sharciyadan (xeerkan) ka hor dhammaadka Ogosto 2021.

Fadlan booqo <https://cutt.ly/OjjWB6k> wixii soo kordha, nooguna soo dir wixii faallo ah [FAST@kingcounty.gov](mailto:FAST@kingcounty.gov).